# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 1 Agoosto 1982, L, 8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa ... anayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.


## K O O B N I I N

SHARCI

QAYBTA KOWAAD


SHARCI L. 21 eeJuunyo 1982, Oggolaansho Heshiis lagu abuurayo Beesha Ganacsiga sokeeye oo ka dhexeeya Dalal ka Bariga iyo K. Afriga — BOG. 635

SHARCI L. 22 ee 4 Luulyo 1982, Oggolaansho Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Urur ka Horumarinta Caalamiga ah (IDA), kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamar. » 636

SHARCI L. 23 ee 4 Luulyo 1982, Sharci la xiriira wax ku kordhin iyo wax ka bedelid Sharciga Nidaamka Garsoorka Lam. 34 ee 22.9.74, qodobadiisa 23 & 32 » 637

SHARCI L. 24 ee 4 Luulyo 1982, Dhismaha Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh.— » 638

SHARCI L. 25 ee 12 Luulyo 1982, Oggolaan sho Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Amaah loogu tala galay Dhismaha Jidka Golweyn—Jilib » 642

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 40 ee 22 Juun. 1982, Meelmarinta Heshiis » 643

Decree No 40 June 1982, Instrument of Ratification.— » 644

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 41 ee 4 Luulyo 1982, Meelmarin Heshiis dhexmaray JDS iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA), kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamar.— » 645

Decree No 41 4 Lug 1982, Instrument of Ratification.— » 646

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 42-16 Seb. 1982, Ruqso Sarkaal.— » 647

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 43 ee 14 Abr. 1982, Dib ugu celin Booliska Ex.G.LE Khaliif Axmed Absuge » 648

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 44 ee 14 Abr. 1982, Wareejin Sarkaal.— » 649

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 45 ee 22 Juun 1982, Meelmarin Heshiis.— » 650

Decree No 45 of 22 June 1982, Instrument of Ratification.— » 651

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 18 Luulyo 1982, Magacaabid Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee Madax tooyada JDS.— » 652

التصديق على اتفاقية قرض اضافى بين حكومة جمهورية
الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى ٦٥١
والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع طريق جلوين — جلب

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

Sharci Lambar 21 Taariikh Oggolaansho Heshiis lagu abuurayo Beesha Ganacsiga Sokeeye oo ka dhe xeeya Dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYO: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

(Qod. 1aad)

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiis lagu abuurayo Beesha Ganacsiga Sokeeye oo dhexma ray Dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika oo ay ka mid tahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaa liya.
2. Heshiiskan iyo brotokollada la xiriira waxaa lagu kala saxiixday magaalada Lusaaka ee Dalka Saam biya taariikhdu markay ahayd 22 Disembar 1981.
3. Heshiiska iyo brotokollada waxay ka mid noqona- yaan Sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska iyo brotokollada kuna tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jam- huuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

(Qod. 3aad)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo maaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo he- shiiska Sharcigaan lagu tilmaamay.

(Qod. 4aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saara- yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Glu. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 22 taariikh Oggolaansho heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA), kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYO: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

(Qod. 1aad)

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA), kuna saabsan amaah Lacageed oo dhan 13.400.000 S.D.R., looguna tala galay Mashruuca Biyaha Xamar.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada COLUMBIA ee walaayadaha Midoobay ee Mareykanka, taariikhdu markay ahayd 26 Maajo 1982.
3. Heshiiska wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D. Soomaaliya.

(Qod. 3aad)

Madaxweynaha JDS, waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo heshiiska lagu tilmaamay.

(Qod. 4aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 23 taariikh 4 Luulyo 1932 Sharci la xiriira wax ku kordhin iyo wax ka bedelid Sharciga Nidaamka garsoorka Lam. 34 ee 22.9.74, qodobadiisa 23 iyo 32.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYO: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

(Qod. 1aad)

Faqrdda 2aad ee qodobka 23aad Sharciga Nidaamka Garsoorka, waxaa lagu kordhiyay ereyada soo socda «Hase yeeshee markii baahi deg deg ah jirto waxaa la soo gaabin karaa muddada dhegeysiga ama tababarka Garsoorayaasha, iyadoo la dhegeystay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta».

(Qod. 2aad)

Faqradda 3aad ee qodobka 32aad Sharciga Nidaamka Garsoorka, waxaa loo bedelay sida soo socota. «Sannadka Garsoorka waxaa la joojinayaa muddo hal bil oo ah 1da ilaa 31ka Maajo, muddadaas Xafiisyada Garsoorka waxay u furnaan doonaan oo keli ah hawlaha deg degga ah».

(Qod. 3aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Luul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 24 taariikh 4 Luulyo 1982 Dhismaha Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYO: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

(Qod. 1aad)

(Dhismaha Guddiga)

1. Waxaa la dhisay Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh.
2. Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh waa Hay'ad aan caadi ahayn, wuxuuna hoos yimaadaa Madaxweynaha J.D.S.
3. Guddigu wuxuu leeyahay Mas'uuliyad wadajir ah, wuxuuna Go'aannada ku guddoonsiinayaa cod hal dheeri ah xubnihiisa.

(Qod. 2aad)

(Ujeeddooyinka Guddiga)

Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh ujeedooyinkiisu waxay yihiin:

a) Sugintaanka ku dhaqanka Sharciyada Dalka.

b) Daafaca Hantida Qaranka.

t) Toosinta iyo turxan bixinta Maamulka Qaranka

j) Ciribtirka dhaqamada Lidka ku ah Maamulka iyo Dhaqaalaha Dalka.

(Qod. 3aad)

(Awoodda Guddiga)

Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh wuxuu awood u leeyahay in uu:

1. Baaro Hay'ad kasta ee Dawladeed ama Dawladdu wax ku leedahay.

2. Amro in la baaro ama la joojiyo baaris ku socota Hay'ad Dawladeed ama Dawladdu wax ku leedahay

3. Amro in la qabto, isagoo adeegsanaya Hay'adaha ku shaqada leh, qof kasta oo lagu tuhmo in uu lunsaado ama cid kale u lunshay hanti Qaranku leeyahay, ama ku kaca fal dembiyeed lid ku ah Maamulka Guud, dhaqaalaha Dalka ama fal dembiyeed waxyeeleynaya habsami u gaarsiinta dadweynaha waxyaabaha Nolosha lagama maarmaanka u ah.

4. Ka qaado marka ay baaristiisa kula soo gudboonaato, lagama maarmaan ay ugu muuqato, Shaqaalaha Dawladda tilaabooyinka anshaxeed ee ku cad sharciga Shaqaalaha Qaranka.

5. Ka gaaro arrimaha uu baaro ama Madaxweynaha JDS ku soo wareejiyo, Go'aan idari ah oo kama dambeys ah oo lagu daryeelayo Hantida Qaranka, habsami u socodka shaqada Qaranka iyo ku dhaqanka shuruucda Dalka.

6. Siiyo awaamiir maamul toosin Hay'ad kasta oo ka mid ah Hay'adaha Qaranka, isla markaana kula xisaabtamo, marka ay lagama maarmaan ugu muuqato, Hay'adaha Dawladda ama Dawladdu wax ku leedahay, fulinta hawlahooda.

7. Amro qof kasta in uu Khasnadda Dawladda u soo celiyo wixii hanti ah ee Qaranku leeyahay ee ku maqnaata, sifo kasta ha ugu maqnaatee, Guddigana u sugnaata, isagoo Go'aankiisa waafajinaya Sharcigan.

8. Amro in la baaro qof kasta ama Hay'ad gaar ahaaneed kasta oo lagu tuhmo fal waxyeeleynaya Dhaqaalaha Dalka ama ka soo hor jeeda Sharciga Ganacsiga Gudaha iyo Dibadda ee Dalka.

9. La tiigsado sharciga, isagoo u gudbinaya Hay'adaha ku shaqada leh, ama toos u ganaaxo ama tillaabo ka qaado qof kasta ama Hay'ad gaar ahaaneed kas-

ta oo ku maqnaata Hanti Qaranku leeyahay, ku xad gudubta Shuruucda Dhaqaalaha ee Dalka ama u hoggaansami weyda Go'aannada Guddiga.

(Qod. 4aad)

(dib u fiirin Go'aan)

Go'aannada Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh waxaa dib u fiirin kara, burin kara ama wax ka bedeli kara Madaxweynaha J.D.Soomaaliyeed.

(Qod. 5aad)

(Awood Kormeer)

Guddiga Qaran ee Xisaabi Xil ma leh wuxuu Kormeeraa, isuna duwaa hawlahooda baariseed, Hay'adaha Baarista ee Qaranka.

(Qod. 6aad)

(Ka reebid)

Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma leh kuma laha awood baaris iyo kormeer hawlaha iyo maamulka Xisbiga Hanti wadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Golaha Shacbiga.

(Qod. 7aad)

(Xubnaha Guddiga)

1. Guddigu wuxuu ka kooban yahay Xubnaha soo socda.

   b) Guddoomiye.

   t) Guddoomiye Ku-xigeenno iyo.

   j) Xubno.

2. Xubnaha Guddiga kor ku tilmaaman waxaa lagu magacaabaa Xeer Madaxweyne.

Dhanka Dhaqaalaha iyo raadadka kale ee Marci-

[illegible]

(Qod. 8aad)

(Habka Shaqada Guddiga)

Habka Shaqada Guddiga, xilka Guddoomiyaha, Gudoomiye Ku-xigeennada iyo Xubnaha kale, waxaa nidaa inaya Xeer gaar ah, oo uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

(Qod. 9aad)

(Burin)

Sharci kasa oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyay.

(Qod. 10aad)

(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 7da Maarso 1982, waxaan lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 25 taariikh Oggolaansho Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah loogu tala galay Dhismaha Jidka Golween Jilib.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYO: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

(Qod. 1aad)

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heeshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha. iyo Bulshada, kuna saabsan amaah Lacageed oo dhan K.D. 3.5 Milyan oo u dhiganta Sh. So. 151.903.100/= oo loogu tala galay Dhismaha Jidka Golween Jilib.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 27.4.1982.
3. Heshiiska wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo Heshiiska.

(Qod. 3aad)

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

(Qod. 4aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweyna waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

## X E E R

Xeer Madaxweyne Lam. 40 ee 22 Juunyo 1982. Meelmarin Heshiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 67aad, xubinta 5aad, Qod. 82aad, xubinta 4aad iyo Qod. 72aad xubinta 1aad ee Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska lagu dhisay Beesha Ganacsiga Sokeeye ee Dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika ee lagu galay Magaalada Lusaka ee Dalka Smbiya 21 Disambar, 1981, taariikhdaas oo Heshiiskaas uu saxeexay Madaxweynaha J.D. Soomaaliya.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshada Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee la xiriirta Heshiiskaas ee 10 Juunyo 1982.

Wuxuu soo saarayaa Xeerka soo socda:

(Qod. 1aad)

Heshiiska lagu dhisay Beesha Ganacsiga Sokeeye ee Dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika ee lagu galay Magaalda Lusaka ee Dalka Sambiya 21 Disembar, 1981 waa la meelmariyay.

(Qod. 2aad)

Qodobada Heshiiska kor ku xusan iyo Brotokoolladiisa ku lifaaqani waxay ku yeelan doonaan dhulka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci, waxayna ku dhaqan gelayaan sida waafaqsan Qodobka 50aad ee Heshiiska.

(Qod. 3aad)

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha J.D. Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dalka.

Muqdisho, 22 Juunyo, 1982

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA

Decree No. Of 40 June 1982, Instrument of Ratification

Somali Democratic Republic

The President

HAVING SEEN : Article 67 paragraph 5, Article 82 Paragraph 4 and Article 72 paragraph 1 of the constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN : The treaty for the establishment of the Proferential Trade Area for Eastern and Southern African States concluded in Lusaka-Zambia on 21 December 1981 on which date the said Treaty was signed by the President of the Somali Democratic Republic.

TAKING NOTE : Of the approval of the Standing Committee of the People's Assembly of the sand treaty on 10 June 1982.

Here by promulgates the following Decree :

Article 1

The treaty for the establishment of the Proferential Trade Area for Eastern and Southern African States concluded on 21 December 1981 in Lusaka-Zambia is hereby ratified.

Article 2

The provisions of the above—mentioned treaty and its protocols annexed there to shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall onter into force in accordance with article 50 of the treaty.

Article 3

This Decree shall enter into force upon signituro by the President of the Somali Democratic Republic, and shall bublished in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 22 June 1982

(Major General, Siad Barre)
President of the
Somali Democratic Republic

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 41 taariikh Meelmarin Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Uururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA) kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka, xubintiisa 4aad.

MARKUU ARKAY: Sharcigu tirsigiisu yahay, taariikh oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday meelmarinta Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskaas la Meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

(Qod. 1aad)

Waxaa la meelmariyay Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA). kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamr, laguna kala saxiixday Magaalada Columbia ee Walaadayaha Midoobay ee Mareykanka taariikhdu markay ahayd 26 Maajo 1982.

(Qod. 2aad)

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa J.D.S. astaan sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Warqadaha meelmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree No. 11 Instrument of ratification.
Somali Democratic Rep. the Presidenti.

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 Poragrapsh (4) ond Article 72, Poragraysh 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The law on 22, the bese of which thepeople assembly has approved the Development Credit Agreement (Second Mogadishu water Supply Project).

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

Article 1

The Development Credit Agreement (second Mogadishu water supply project) between Somali Democratic Republic and International Development Associa tino, which signature took in COLUMBIA U.S.A., on 26 th mey1982.

Article 2

This agreement shall have the force of thelaw in the Territory of the Somlai Democratic Republic and will be imblemented on the exchange of ratification papars.

Article 3

This Decree shall enter into force upon signatuer by the president of the Somali Democratic Repyblic and shall be pubblished inthe Official Bulletin of the State.

Mgdishu 4 LUG. 1982

PRESIDENT OF THE S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 42 ee 16 Feb.1982
Ruqso Sarkaal.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii ee ku saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 6 ee 31.12.1969kii ee saameeya xaqa iyo Gunnada Ciidamada Qalabka sida (Pension and gratuity).

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Ciid.A12.8 ee 15.2.1982.

WUXUU XEERAY

(Qod. 1aad)

In Gaashaanle Dhexe Axmed Maxamed Halac oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed laga ruqseeyo Shaqada Ciidanka Boliiska karti darro awgeed marka laga bilaabo 16ka Febraayo 1982ka.

(Qod. 2aad)

In Sarkaal la siiyo wixii xaq ah ee uu siinayo Sharcigu.

(Qod. 3aad)

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 16.2.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.43 14 Abr. 1982 Dib ugu celin Boliiska EX. Gashaale Khaliif Axmed Absuge.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972 ee kl saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed,

MARKUU TIXGELIYEY: Taladauu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Xog.Po.3.82 ee 11.4.1982.

WUXUU XEERAY

(Qod. 1aad)

In Ex. Gaashaanle Khaliif Axmed Absuge ee hore uga tirsanaan jiray Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed dib loogu soo celiyo Ciidanka Boliiska marka laga bilaabo 1.4.82, isagoo shaqadiisu noqoneyso xagga muddada xiriir.

(Qod. 2aad)

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 14.4.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 44 ee 14.Abr. 1982
Wareejin Sarkaal.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii ee ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xog.A. 12.82 ee 13.4.1982.

WUXUU XEERAY:

(Qod. 1aad)

In Gaashaanle Dhexe Calinuur Sahal Kooshin ee ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed si rasmi ah loogu wareejiyo Taliska Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed marka laga bilaabo 1.4.1982, isagoo ka mid noqonaya Saraakiisha Joogtada ah ee Taliska Nabadsugida.

(Qod. 2aad)

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada

Muqdisho, 14.4.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 45 taariikh meelmarinta Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah loogu tala galay Dhismaha Jidka Golween Jilib.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, xubintiisa 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay, taariikh ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday meelmarinta Heshiiska ujeedada ku qoran.

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskaas.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

(Qod. 1aad)

Waxaa la meelmariyay Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah Lacageed oo dhan K.D.3.5 Milyan oo u dhiganta Sh. So. 151.903.100 oo loogu tala galay dhismaha Jidka Golween Jilib, Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 27.4.82.

(Qod. 2aad)

Heshiisku wuxuu ku yeelanayaa J.D.S. astaan Sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Waraaqaha meelmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12. Lul. 1982

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٤٥ بتاريخ ١٢ ـ ٧ ـ ١٩٨٢
التصديق على اتفاقية قرض اضافى بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع طريق جلوين ـ جلب

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الرابعة من المادة ٧٢ من الدستور،
وعلى القانون رقم ٢٥ بتاريخ ١٢ ـ ٧ ـ ٨٢ والذى بموجبه وافق على الاتفاق السالف الذكر .
ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية المذكورة أعلاه .

يرسم

بما هو :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض الاضافى بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع طريق جلوين ـ جلب، المبرمة فى مدينة الكويت بتاريخ ٢٧ أبريل ١٩٨٢م.

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل بها اعتبارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر فى الجريدة الرسمية .

مقديشو ١٢ ـ ٧ ـ ١٩٨٢

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 46 ee 18 Lul. 1982 Magcaabid Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19ka Oktoobar 1970, kuna saabsan Dhismaha habka Abaalmarinta Qaranka.

MARKUU TIXGELIYAY: In lagama maarmaan tahay in dib loo dhiso Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee Madaxtooyada J.D. Soomaaliya.

WUXUU XEEREEYAY:

(Qod. 1aad)

Laga bilaabo maalinta 4.7.1982, waxaa la magacaabay Xubnaha Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee Madaxtooyada JDS, oo kala ah sidatan:

1. Jaalle S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf
— Guddoomiye

2. Guddoomiyaha Hog. Abaabulka iyo Kicinta XHKS
— Ku-xigeen

3. Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
— Xubin

4. Wasiirka Dawladaha Hoose iyo HRM.
— Xubin

5. Qof Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga Qa.
— Xubin

6. Guddoomiyaha Xirii. Guud Ururada Sh. Soo/liyeed
— Xubin

7. Garyaqaanka Guud ee Dawladda

(Qod. 2aad)

Isla maalinta 4.7.1982, waxaa la baabi'iyay Guddigii hore ee Abaalmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkan wuxuu dhaqan galaya marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaanna lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah eeJDS.

Muqdisho, 18 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre